# Waa Maxay Si Xun Ula Dhaqan Sidee Ayeyse U Saameyn Kartaa Shaqadeyda?

What Is Maltreatment and How Can It Affect My Job?

## Waa maxay si xun ula dhaqan?

Si xun ula dhaqan waa marka ay hay'adda badbaadada caruurta ama dadka waaweyn ay go'aamiyaan in qof weyn oo nugul ama caruur aad gacanta ku heysay uu dhaawac gaaray ama aad dayacday. Qof weyn oo nugul waa degan goob ama meel lagu hayo, oo loo fidiyo adeeg ay waajib tahay in ay leesin u heystaan sida uu dhigayo sharciga, ama naafo jirka ama maskaxda ka ah. Tusaale la wada garan karo waxaa u noqon karaa: burbur jirka ah ama xagatin, lafa jabay, handadaad afka ah ama xad gudub afka ah, hantidiiisa oo daba mar lagu sameeyo, ilmaha oo laga tago, ama qofka nugul oo keli looga tago iyada oo aan si wanaagsan loola socon.



## Sidee ayaa go'aanka si xun ula dhaqanka saameyn iigu yeelan karaa?

Si xun ula dhaqanka kama muuqanayo diiwaankaaga fal dambiyeedka, laakiin waxaa ay degmada iyo gobolku u adeegsan karaan taariikh dambiyeedkaaga ee shaqooyinka sida tooska ah macaamiisha loogu adeego. Waxa ay kaa hor istaagi kartaa in aad ka shaqeyso shaqooyinka noocaas ah 7 ilaa 10 sano.

Si xun ula dhaqanka waxa ay saameyn ku yeelan kartaa shaqooyinka soo socda:

- Daryeelka caafimaadka ama goobaha dadka lagu hayo
- Goob Caruurta Lagu Hayo (Childcare)
- Dadka caruurta loo dhiibo
- Dadka Caruurta koriya
- Ka shaqeeya xabsiyada ama la talinta isticmaalka maandooriayayaasha
- Shaqo kasta oo si toos ah aad ula shaqeyneyso qof weyn oo nugul ama caruur.

Si ay saameyn kuugu yeelato si xun ula dhaqanka waa in ay noqotaa mid khatar ah oo "soo noqnoqota" Taasi waxa ay ka dhigan tahay waa in ay dhacday wax ka badan hal mar waana in uu ka dhashay dhaawac.

Diiwaanka oo ay kuu gasho si xun ula dhaqan kuma galeysid xabsi, ganaax, ama lagaagama qaadayo xuquuqda waalidnimada. Laakiin waxaa suurogal ah in ay keeni karto fal dambiyeed lagugu qaado ama talaabo ay kaa qaadaan badbaadada caruurta.

## Maka dagaalami karaa go’aan laga gaaray si xun ula dhaqan?

Haa, waad ka dagaalami kartaa si xun u dhaqan lagugu qaaday, laakiin waa in aad racfaan ka qaadataa ka hor inta aan laga gaarin go’aanka ugu dambeysta ah. Muddo gaaban ayaad heysataa. Waa in aad raacdaa mudada go’an ee ku xusan warqadda ay kuu soo dirto hay’adda kugu eedeysay si xun ula dhaqanka. Waxaa wanagsan in aad hesho qareen ku caawiya.

Waxa aad degmada ama gobolka weydiisan kartaa in ay “ka noqdaan” ama “dib uga laabtaan”, go’aanka si xun ula dhaqanka. Haddii aad ku guuleysato, lagaama joojinayo shaqada daryeelka in lagu soo eedeeyey darteed.

## Maka dagaalami karaa go’aan laga gaaray si xun ula dhaqanka?

Markiiba ka qaado racfaan qoraal ah muddo **15 cisho** gudahood ah. Racfaan qoraal u soo dir xitaa haddii aadan heli kareeyn qareen ku caawiya. Haddii aadan racfaanka qaadan, waxaad waayeysaa fursad aad naftaada ku difaacdo waligaa. Faahfaaahin ka bixi sababta cadeyneysa in aadan gelin si xun u dhaqanka lagugu soo eedeeyey.

Tusaaale ahaan:



- Xadgudubka ama dayaca maka dhashay natiijada shil dhacay?
- Ma waxa aad isticmaashay edbinta suurogal ee waalidnimo?
- Ma qof kale ayaa mas’uul ka ahaa xadgudubka ama dayaca?
- Qofka dhibanaha ah run ma ka sheegay sheegashada?
- Ma jiraan markhaatiyaal taageeri kara dhinacaaga?
- Haddii aad ka shaqeyso goob caruurta lagu hayo, dhawaac aan khatar aheyn oo gaara ilmaha waxaa loo tixgeliyaa “khalad aan si xun loola dhaqmin.”

Qor faahfaahinta ugu badan ee suurogalka ah.

Waa in aad sidoo kale faahfaahin ka bixisaa sababta aanay si xun ula dhaqanku aheyn mid khatar ah ama soo noqnoqday, si aad uga hortagto in aysan sabab u noqon in lagaa joojiyo shaqooyinka daryeelka dadka ee mustaqbalka. Tusaaale ahaan:

- Ma dhacday wax ka badan halmar?
- Dhaawac ma dhacay?
- Haddii ay dayac tahay, dhaawacu ma ahaa mid si fudud lagu daaweyn karo ama lagu daweyn karay dawo aan dhakhtar qorin?

Waxa aad codsan kartaa nuqul ka mid ah galka badbaada ee ilmaha ama qofka weyn ee lagu gaaray go’aanka si xun ula dhaqanka si aad u aragto cadeynta liddiga kugu ah. Waa in aad galka (feylka) soo qaadataa sida ugu dhaqsaha badan ee marka lagugu eedeeyo si xun ula dhaqan.

## Maxaa dhacaya haddii racfaankeyga la diido?
Haddii codsigaaga qoraalka ee racfaanka la diido ama aadan ka helin jawaab 15 cisho gudahood, waxa aad codsan kartaa dhageysi uu sarkaal xafiiska ka tirsan dhageysto.

Dhageysiga waxa aad soo bandhigi kartaa cadeymaha aad naftaada ku difaaceyso. Waxa aad maxkamad uga yeerid u diri kartaa markhaatiyaal dhinacaaga ah dhageysiga si ay uga hadlaan dhageysiga. Maxakamad uga yeeris waa amar maxkamadeed oo faraya in ay yimaadaan dhageysiga.

Wargeli sarkaalka dhageysanaya sida ugu dhaqsaha badan in aad dooneyso in aad maxkamad uga dirto markhaatiyaal ama si aad u hesho qaar ka mid ah qoraalada. Waxa ay kuu soo dirayaan foomamka maxkamad uga yeerista. Sida loo codsado dhageysi ku saabsan eedeyn laguu soo jeediyey ee si xun ula dhaqan waxaa laga heli karaa warqadaha la socda warqadda ay hay'addu kuu soo dirto. Haddii aad ku guuleysato dhageysiga, dawladda ama degmada way ka noqdaan eedeynta si xun ula dahqanka oo waad ka sii shaqeyn kartaa shaqooyinka u adeegga iyo daryeelka dadka.

Haddii lagaaga adkaado dhageysiga, waxa aad go'aanka racfaan uga qaadan kartaa maxkamadda degmada halka uu si xun ula dhaqanka go'aanka looga gaaray. Waa in aad racfaan ku qaadataa 30 cisho gudahood. Haddii aadan ku guuleysan maxkamadda degmada, waxa aad racfaan u qaadan kartaa Maxkamadda Racfaanka ee Minnessota 60 cisho gudahood ka dib go'aanka maxkamadda.

## Maxaan yeelayaa haddii ay ila dhaafto taariikhda kama dambeysta ama aanan ku guuleysan racfaanka?

Haddii aad dib uga dhacdo ama lagaaga adkaado racfaan qaadashada, si xun ula dahqanka waxa ay ku jireysaa diiwaankaaga.



Si xun ula dhaqan ku jirta diiwaankaaga waxa ay kaa hor istaageysaa in aad ka shaqeyso shaqooyinka dadka loo adeego 7-10 sano. Laakiin weli waad ka shaqeyn kartaa shaqooyinka dadka loo adeego haddii:

Si xun ula dhaqanku aheyn mid aad khatar u ah ama soo noqnoqonaya

AMA

Laguu ogolaado "dhinac iska dhigid" ama "kor kala socosho."

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida lagu helo "dhinac iska dhigid" ama "kor kala socosho" akhri xogta urursan ee [*Shaqo Ka Joojinta*](#).

## Ma wax kale oo aan sameyn karo ayaa jira?

Haddii aad hubto in aanay marna ku soo gaarin warqadda go'aanka si xun ula dhaqanka, codso nuqul ka mid ah galka xafiiska badbaadada ee caruurta iyo dadka waaweyn ee degmada meesha lagu gaaray si xun ula dhaqanka. Hubi in warqadda degmada ama gobolka ay galka ku jirto. Haddii aadan horey u codsan, ka docso gobolka ama degmada in ay ku siiyaan fursad aad kaga dagaalanto eedeymaha (racfaan).

Ugu horeyn, waa in aad racfaan ka qaadataa warqadda lagugu wargeliyey in lagaa joojiyey shaqooyinka qaarkood. Qoraal racfaan ah u soo dir ka hor inta aan la gaarin taariikhda ku qoran warqadda.

Marka xiga, wargeli sarkaalka dhageysanaya iyo qareenka kaa soo horjeeda in aad dooneyso in aad dib u furto go'aanka si xun ula dhaqanka waayo kuma aanay soo gaarin eedeymaha la xiriira si xun ula dhaqanka ee lagugu soo eedeeyey.

Haddii ay diiwaanka kuu gasho si xunula dhaqan, waxa aad xasuusnaataa in 7 ilaa 10 sano ka dib aanay kaa hor istaageyn shaqooyinka dadka loo adeego oo aad mar kale ka shaqeyn karo shaqooyinkaas. Sidoo kale, diiwaanka si xun ula dhaqanka kaama hor istaagayo in aad ka shaqeyso shaqooyinka kale oo aan loo baahneyn in aad si toos ah ugu adeegto dadka waaweyn ee nugul iyo caruurta.

## Xagee ayaan ka heli karaa caawinaad?

Xafiiska Gargaarka Sharciyada ee degaanka ayaa ku caawin kara. Ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529. Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Qareeno gaar ah waxa aad ka heli kartaa adiga oo la xiriira Adeegga Qareenada ee ururka Qareenada ee Minnesota www.mnfindalawyer.com.



*Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.* *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**